



Isticmaalidda Koronto-dhaliye Marka Korontadu Go'do

Ha culays dhaafin koronto-dhaliyahaaga

- Garo qadarka koronto ee aad u baahan doontid si aad u hawlgalisid qalabka aad ku talojirtid inaad ku xidhid koronto-dhaliyaha.
 - Waatyada nalalka iftiinka waxa loola jeedaa awoodda koronto ee loo baahan yahay si iftiin loo helo.
 - Qoraalada ku yaala alaabta iyo qalabka ayaa sheegaya qadarka awood koronto ee ay u baahan yihiin.
- Haddii aanad garan karin awoodda koronto ee aad u baahan tahay, weydii koronto-yaqaan.
- U hubso in koronto-dhaliyahaagu uu soo soo saaro awood koronto oo ka badan inta ay ka qaadan doonaan waxyabaha aad ku xidhaysid koronto-dhaliyaha, oo ay ku jiraan awoodda dhufashada bilawga (surge) marka qalabka la daaro. Haddii koronto-dhaliyahaagu aanuu soo saarayn awood koronto oo u kulan in wax kasta isku wakhti la hawlgaliyo, kala reeb isticmaalka qalabkaaga.
- Haddii qalabkaagu uu isticmaalayo awood koronto oo ka badan inta uu koronto-dhaliyahaagu soo saarayo, waxa laga yaabaa inuu gubto fiyuus ku yaala koronto-dhaliyaha ama uu waxyeeleeyo qalabka ku xidhan.

Si ammaan ah u isticmaal koronto-dhaliyahaaga

- Isticmaalka aan sax ahayn ee koronto-dhaliyaha waxa uu keeni karaa sumowga kaarbon monoksaydh oo ka imanaysa naqaska sunta ah ee ka soo baxaya injiinka, shoog koronto ama qabsasho koronto iyo dab. Raac fariimaha la socday koronto-dhaliyaha.
- Guriga ku rakib qalabka digniinta kaarbon monoksaydh oo baytari ku shaqeeya ama sameyso baytariyo kayd ah. Tijaabi baytariyada marrar badan oo beddel haddii loo baahdo.

Marna gudaha ha ku isticmaalin koronto-dhaliye

- Marna koronto-dhaliye ha ku isticmaalin gudaha geerash, meel lagu xereeyo baaburta, aaggaa hoose ee guriga (basement), meel cidhiidhi ah ama meel kale oo xidhan ama badh ahaan xidhan, xiitaa haddii uu jiro hawo soo galin iyo saaris. Albaabada iyo daaqadaha oo la furo ama marawaxado la isticmaalo ma joojin doonto in kaarbon monoksaydh ka buuksanto gudaha guriga.
- Haddii aad dareentid inaad jirran tahay, dawakhsan tahay, ama tabar-daran tahay adiga oo isticmaalaya koronto-dhaliye, isla markiiba u bax hawo cusub — ha sii daahin!

Koronto-dhaliyaha oo lagu isticmaalo dibadda

- Koronto-dhaliyaha dhig meel ka fog daaqadaha, albaabada, iyo meelaha hawadu ka soo gasho ee kaarbon monoksaydh u oggolaan kara inay gudaha soo gasho.
- Koronto-dhaliyayaashu waa inay ugu yaraan 20 fiit u jiraan dhismeyaasha. Xiitaa marka ay kuu jiraan 20 fiit, hababka socodka hawada ayaa wali kaarbon monoksaydh soo galin kara guryaha iyada oo ka soo galaysa dalolo, daaqado, ama albaabo, sidaa daraadeed aad bay muhiim u tahay inaad gudaha guriga ku haysatid dareeme kaarbon monoksaydh oo shaqeynaya.
- Si aad isaga ilaalsid qabsasho koronto, koronto-dhaliyaha ka ilaali qoyaanka. Ha ku isticmaalin roobka ama meelo qoyan. Ku hawlgali sagxad qallalan dushana ha ka sareeyo saqaf hareeraha ka furan. U hubso in gacmaahaagu qallalan yihiin ka hor inta aanad taaban koronto-dhaliyaha.

Shidaalka koronto-dhaliyaha u kaydi oo u isticmaal si ammaan ah

- Dami koronto-dhaliyaha oo daa ha qaboobo ka hor ku shubista shidaalka. Baatoolka/bensiinka ku daata qaybaha kulul ee injiinka dab ayaa ka kici kara.
- Shidaalka koronto-dhaliyaha ku kaydi weel ama daasad/caag ammaan ah oo la aqbalsan yahay oo taala meel dibadda ka ah meelaha lagu nool yahay hana taalo qol yar oo qufulan ama meel kale oo badbaadsan. Wawa laga yaabaa in sharciyada degmadu ay xadeeyaan isticmaalka ama kaydinta shidaalka. Waaxda dab-damiska ee degmadaada weydii macluumaad.
- Haddii uu kaa daato shidaal ama aanad si sax ah u xidhin weelka uu ku jiro, uumi aan la arkayn ayaa ku socdaali kara dhulka waxana ololin kara nalka hubinta ee qalab (pilot light) ama dab ka soo booda iswijkha ama barta laga daaro qalabka.
- Isticmaal nooca shidaal ee ay sheegayaan fariimaha la socda koronto-dhaliyaha ama ku yaala qoraalka dushiisa.

Si sax ah u xidhiidhi koronto-dhaliyahaaga

- Qalabka korontada ku shaqeeya si toos ah u gali koronto-dhaliyaha, ama isticmaal xadhig dheereyn (extension) oo loogu talogalay shaqo culus oo ku qiiimeysan (waat ama ambeer ahaan) ugu yaraan isku-darka korontada ay isticmaalayaan qalabka ku xidhan.
- Marna ha isku dayin inaad fiilooyinka ama waayirada guriga dabeysid adiga oo koronto-dhaliyaha ku xidhiidhinaya ama galiyana god koronto oo derbiga ah (gadaal ka dabeyn). Waxay keeni kartaa in korontadu qabsato shaqaalaha korontada ama deriska uu korontada siyo isku hal taraansfoormar (transformer) oo ah isla shirkadda korontada.

(dheeraad ka fiiri bogga dhabarka)



Wasaaradda Caafimaadka ee Gobolka Washington

PO Box 47890
Olympia, WA 98504-7890

Bogga Internetka:
www.doh.wa.gov

360-236-4027
(800) 525-0127

DOH Pub 821-034
Somali

- Habka kaliya ee koronto-dhaliyaha si ammaan ah loogu xidhi karo fiilooyinka ama waayirada korontada ee guriga waa iyada oo koronto-yaqaan xirfad leh uu kuu rakibo iswiji kala wareejin koronto (power transfer switch).

**Sida ugu ammaan badan ee lagu helo koronto xilliga
xaalad degdeg ah**

Koronto-dhaliye si joogto ah loo rakibay ayaa ah habka ugu fiican ee guriga lagu siin karo koronto beddel ah marka korontada shirkaddu go'do.